Casharka 21

1. Muxuu ahaa dhibkii u hdexeeyey Luut iyo Aabraam?
-Waayo labadaba waa Aabraam iyo Luut e waxay lahaayeen ido iyo lo' aad u badan, oo labadaba ma ayan wada heli karin dhul-daaq ku filan xoolahooda.

2. Maxaa haddaba Luut u doortay inuu dhulka hoose aado?
-Wuxuu u doortay in dhulkaasi lahaa berrimo wacan oo idihiisa iyo loodiisuba daaqnod.

3. Waa maxay sababta Luut ku khaldamay markuu soo aaday dhulka hoose?
-Waayo Luut Ilaah ma weydiisan waxa ay ahayd inuu sameeyo.
-Waayo Luut wuxuu diiday inuu maqlo codka Rabbiga.

4. Maxaa haddaba dhacaya haddii aynu diidno inaan maqalno Ilaah?
-Waxaannu gelaynaa harada dabka ah ee daa'imiska ah.

5. Miyaa ido iyo lo' badan ama hodantinnimo inaga badbaadinaysaa Harada dabka ah ee daa'imiska ah?
-Maya.

6. Miyaa Ilaah arkay sharka dadkii Sodom iyo Gomorah?
-Haa.

7. Miyaannu Ilaah ka qarin karnaa wax waliba ee qalbiyadeenna ku jira?
-Maya.

8. Miyaannu Ilaah ka qarin karnaa wax waliba ee aynu doonayno



inaynu niraahno?
-Maya.

9. Miyaannu Ilaah ka qarin karnaa wax waliba ee aynu samayno Ilaah?
-Maya.

10. Maxaa Ilaah u sheegay Aabraam kaddib markii Luut soo aaday dhulka hoose ee berrimada wanaagsanaa?
-Ilaah wuxuu ku yiri Aabraam, Waxaan ku siin doonaa dhulka Kancaan oodhan.
-Ilaah wuxuu Aabraam ku yiri waxaad yeelan doontaa farac aad u badan oo wakhti kooban oo gaaraya 400 oo sanaadood, ku noolaan doona dal shisheeye, laakiin di ugu soo noqon doona Kancaan.

11. Muxuu ahaa magacii kale ee Ilaah siiyey Aabraam?
-Ibraahim.

12. Muxuu ahaa magacii cusbaa ee la siiyey Saaray?
-Saarah.

13. Maxaa Ilaah Aabraam iyo Saaray u siiyey magac cusub?
-Waayo waxay lahaan doonaan labaduba farcan aad u badan, oo iyaga ka iman doona.

14. Maxaa Aabraam iyo Saarah u yeelan waayeen carruur?
-Saarah waxay ahayd ma dhalays.
-Ibraahim wuxuu ahaa boqol jir, Saarahna waxay ahayd sagaashan jir.

15. Meeqa jir bay ahaayeen Ibrahim iyo Saarah?
-Ibraahim wuxuu jiray boqol sannadood, Saarahna waxay jirtay 99

sannadood.

16. Miyaa haddaba ay jiraan sheey aanu Ilaah samayn karin?
-Maya.

-Miyaad xusuusataa in Ilaahim iyo Luut ay kala guureen maaddaama ay lahaayeen ido iyo lo' badan oo ayan hal berrin wada daajin karin xoolahooda oo dhan?

-Halkee buu Ibraahim u guuray?
-Wuxuu u guuray Buuraha.
-Halkee buu Luutna u guuray?
-Wuxuu u guuray dhulka hoose.

-Maxaa la odhan jiray magaalooyinkii dooxada ku yiiil?
-Waxaa la kala oran jiray Sodom iyo Gomorah.

-Maxaa lagu masaali karay dadkii degganaa Sodom iyo gomorrah?
-Waxay ahaayeen dad shar badan.

-Miyaa Ilaah garanayey sharka dadkii Sodom iyo Gomirrah?
-Haa.

-Sidee baa Ilaah ku ogaaday sharka dadka Sodom iyo Gomorah?
-Ilaah wuxuu arkaa wax waliba.
-Ma jiro wax aanu Ilaah arki karin.

-Ilaah wuxuu arkay sharkii dadkii Sodom iyo Gomorrah degganaa.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 18:20-21

20-Rabbiguna wuxuu yidhi, Qaylada Sodom iyo Gomora



way badatay, dembiyadooduna aad buu u weynaaday.

21-Haddaba waan degi doonaa, oow axaan arki doonaa inay wada sameeyeen sida qayladu ii soo gaadhay iyo in kale; haddanay wada samaynna, waan ogaan doonaa.

-Ilaah wuxuu garanayey dullinnimada dadkii Sodom iyo gomirrah ilaa iyo wakhti dheer.

-Dadka Sodom iyo Gomorrah ayaa waxay illoobeen wax ku saabsan Ilaah, laakiin miyaa Ilaah illoobay wax iyaga ku saabsan?
-Maya.

-Dadkii Sodom iyo Gomorrah waxay illoobeen Ilaah, miyase Ilaah illoobay dembiyadooda?
-Maya.

-Haddii dadku ay Ilaah illoobiin, miyuu Ilaahna iska illoobay iyaga?
-Maya.

-Haddii Ilaah illoobay iyaga, miyuu illoobay dembiyadoodii?
-Maya.

-Ilaah ma illoobi karo dembiga.
-Ilaah waa khasab in uu ciqaabo dembi kasta.

-Waa maxay sabbta Ilaah u ciqaabo dembiga oo dhan?
-Waayo Ilaah waa Kaamil.
-Waayo Ilaah dadka u abuuray si kaamil ah.

-Waayo dembi waliba Ilaah buu lid ku yahay.

-Waa maxay sababta Ilaah aanu isla markiiba ugu ciqaabin dadkii reer Sodom iyo gomorrah dembiyadooda?

-Waayo Ilaah wuxuu doonayey inay ka toobad keenaan dembigooda.
-Waayo Ilaah uxuud oonayey oo kale inuu iyaga badbaadiyo.

-Wakhtigii Nuux, ilaa iyo imisa sannadood buu Ilaah dhowrayey in dadku dembiyadooda ka toobad keenaan?
-120 sannadood.

-Kaddib markii dadkii diideen inay toobad keenaan, maxaa Ilaah sameeyey?

-Ilaah wuxuu soo diray daad kaasoo baabi'iyey dadkii oodhan.
-Ilaah wuxuu dhowrayey in dadku dembiyadooda ka soo noqdaan.

-Ha yeeshe haddii dadku ayan dembiyadooda ka soo noqon, Ilaah wuu ciqaabayaa.

-Maxaa Ilaah aanu isla markiiba dadka dunida ugu ciqaabin dembiyadooda?

-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inay marka hore ka toobad keenaan dembiyadooda.

-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inuu badbaadiyo.

-Miyaa Ilaah dadka u dhaartaan, laakiin aanu u ciqaabin dembiyadooda?
-Maya.



-Ilaah wuu ciqaabayaa duniibta dadka.

-Markii la gaaro wakhtigii Ilaah ciqaabi lahaa dembiileyaasha, miyaa cidi Ilaah ka joojin kartaa inuu wax ciqaabo?
-Maya.

-Markii la gaaro wakhtigii Ilaah ciqaabi lahaa dembiileyaasha, ma jiro mid ka baxsan kara ciqaabta Ilaah.

-Maalin maalmaha ka mid ah, Ilaah wuxuu soo diray laba ka mid ah malaa'igihiia oo timid Sodom.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 19:1-3

1-Oo labadii malaa'igood baa Sodom fiidkii yimid; Luutna wuxuu fadhiyey iridda Sodom. Oo markuu Luut iyagii arkay ayuu u kacay inuu ka hor tago. Wuuna sujuuday oo weligiisuu dhulka saaray.
2-Oo wuxuu ku yidhi, Bal eega, sayidyadaydiiyow, soo leexda, waan idin baryayaaye, oo gala guriga addoonkiinna, oo caawa oodhan jooga, oo cagamaydha. Aroortii baanad kici doontaan oo iska tegi doontaane. Oo waxay ku yidhaahdeen, Maya; laakiin jidkaannu joogaynaa caawa oo dhan.
3-Aad buuna u baryay; xaggiiayna u soo leexdeen, oo gurigiisii bay galeen, diyaafad buuna u sameeyey, kibis aan khamiir lahaynna wuu u dubay, wayan cuneen.

-Waa maxay sababta Ilaah ugu soo diray labadan malag Sodom?
-Ilaah wuxuu doonayey inuu badbaadiyo Luut iyo qoyskiisa.

-Beryhii hore, Luut wuxuu ku noolaa meel u dhowayd Sodom.

-Balse imminka, Luut wuxuu ku soo dhex degay magaalda Sodom.

-Beryihii hore Luut wuxuu ku noolaa meel u dhow magaaladan dulliga ah ee Sodom,

-Imminkase wuxuu ku nool yahay, Luut magaaladii dulliga ahayd ee Soddom dhexdeeda.

-Waana waxa dembigu ku sameeyo dadka oodhan.

-Dembigu dadka ayuu isku keenaa, oo wuxuu u soo dhoweeyaa sharka.

-Isla sida dembiga uu nebi Luut ugu soo dhoweeyey Sodom, oo kale miyaa dembigu dadka oo dhan ugu soo dhoweeyaa sharnimada?

-Dembigu wuxuu isku keenaa dadka, dabadeedna wuxuu ku soo dhoweeyaa shar iyo dullinnimo.

-Maxaa ku dhacay malaa'igaha markii ay booqdeen Luut?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 19:4-9

4-Laakiinse intaanay jiifsan ka hor, waxaa gurigii harreeyey nimankii magaalada, oo ahaa nimankii Sodom, yar iyo weynba, dadkii oodhann oo ka yimid meel kastaba.

5-Oo Luut bay u yeedheen, oo waxay ku yidhaahdeen, Meeye nimankii caawa kuu yimid? Dibadda noogu soo bixi iyaga, aannu fuulnee.

6-Oo Luutna dibadduu ugu baxay iyagoo albaabka jooga, albaabkiina wuu xidhay.



7-Oo wuxuu yidhi, Waan idin baryayaaye, walaalahayow, ee wax sidaas u xun ha samaynina.

8-Bal eega, waxaan leeyahay laba gabdhood ooaan weli nin u tegin; haddaba waan idin baryayaaye, aan idiin soo bixiyo iyaga, oo saad doontaan u gala, laakiin nimankan uun waxba ha ku samaynina, maxaa yeelay, waxay soo hoos galeen dugsiga saqafkayga.

9-Waxayna yidhaahdeen, Dib u joogso. Oo waxay kaloo yidhaahdeen, Ninkanu socdaal buu ku yidhi, oo wuxuu doonayaa inuu xaakin noqdo. Haatan wax daran baannu kugu samayn, intaannu iyaga ku samayn lahayn in ka sii daran. Markaasay si xun ninkii Luut ahaa u riixeen. Waxayna ugu soo dhowaadeen inay albaabka jebiyaan.

-Dadkii Sodom iyo Gomorrah waxay ahaayeen dad dulli ah.

-Dadkaasu waxay ahaayeen beenaaleyaal.
-Dadkaasu waxay ahaayeen kuwo dadka si been ah ku eedeeya.
-Dakdaasu waxay inkaareen deriskooda.

-Ddkaasu waxay xadeen oo kale hanti ay dad kale lahaayeen.
-Dadkaasu waxay la seexan jireen dumarka ragga kale ay qabaan.
-Dadkaasu waxay dili jireen dadka kale.

-Welibana waxaa ka buuxay rag ragga kale la siixda.

-Miyaa dadka maanta la mid yihiin dadkii reer Sodom iyo Gomorrah?
-Haa.

-Ma waxaa qarnigeennu la mid yahay qarnigii dadkii Sodom iyo Gomorrah?

-Haa.

-Sidee baynu ula mid noqon karaa dadkii Sodom iyoGomorrah?

-Waxaynu sheegnaa been aa du badan.
-Weliba waxaynu dadka ku furnaa marag been ah.
-Waxaanan caynaa derisyadayada.

-Waxaynu soo bililiqaysannaa waxa dadka kale ay leeyihiin.
-Weliba waxaynu la jiifsannaa dumar rag kale qabo.
-Waxaanan dilnaa dadka kale.

-Maxaa hadddaba malaa'igtii Ilaah ay samaysay?

Bal aynu akhrinno Bilwogii 19:10-17

10-Laakiinse nimankii baa gacmahoodii soo bixiyey, oo Luut bay gurigii soo gasheen, markaasay albaabkii xidheen.

11-Wayna indho tireen nimankii guriga albaabkiisa joogay, yar iyo weynba: oo saas daraaddeed way ka daaleen inay albaabkii helaan.

12-Oo nimankii waxay Luut u yidhaahdeen, Intan mooyaane wax kale ma ku leedahay meeshan? Wiil aad soddog u tahay iyo wiilashaada iyo gabdhahaaga, iyo k alla kaad magaalada ku leedahay kala soo bax meeshan;

13-Waayo, meeshan waannu baabi'in doonaa, maxaa yeelay, qayladoodii baa Rabbiga hortiisa aa ugu badatay, oo Rabbigu wuxuu noo soo diray inaannu baabi'inno.

14-Markaasuu Luut dibadda u baxay, oo wuxuu la hadlay wiilashuu soddogga u ahaa, oo gabdhihiisa qabay, oo wuxuu ku yidhi, Kaca, oo ka soo baxa meeshan; waayo, Rabbigu magaalada wuu baabi'in doonaa. Laakiin wuxuu wiilashuu soddogga u ahaa ula ekaaday sidii mid ku cayaaraya.



15-Oo markii waagii beryay ayaa malaa'gitihii Luut deddejiyeen, Iyagoo leh. Kac, oo la tag naagtaada iyo labadaada gabdhood oo halkan jooga; waaba intaasoo aad dembiga magaalada ku baaba'daane.

16-Laakiin markuu raagay ayaay nimankii gacantiisa qabteen, iyo gacantii naagtiisa, iyo gacantii labadiisii gabdhood; Rabbiguna waa u naxariistay isga, iyana way soo bixiyeen, oo waxay geeyeen magaaladii dibaddeeda.

17-Oo markay dibadda u soo bixyeen ayuu ku yidhi, Naftaada la baxso; gadaashaadana ha eegin. Bannaanka oodhanna ha joogsan, ee buurta u baxso, waaba intaas oo aad baaba'daaye.

-Malaa'igta waxay gacanta soo qabteen, naagtiisa, iyo laba gabdhood oo kale, oo waxay u soo saareen magaalada dibaddeeda.

-Maxaa sabab u ah oo Ilaah u badbaadiyey Luut?

-Miyaa Ilaah u adbaadiyey Luut wanaaggiisa?
-Maya.

-Ilaah uma uusan badbaadinin Luut inuu nin wanaagsan ahaa aawadeed.

-Inkastoo Luut la mid ahayn reer Sodom, Luut wuxuu ahaa qudhiisu dembiile.

-Luut wuxuu ahaa dembiile sida dadka kale oodhan.

-Maxay ahayd sababtii Ilaah u badbadiyey Luut?
-Wuxuu ku badbaaday grashadiisa ah in dembiyadiisu ay u qalmaan dhimasho.

-Waayo Luut wuxuu garanayey in Ilaah oo keliya awood u alaha inuu badbaadiyo isaga.

-Waayo Luut wuxuu kaloo rumaystay in Ilaah soo diri doona Badbaadiyihii isaga dembiga ka soo furan lahaa.

-Ilaah mar waliba wuxuu badbaadiyaa kuwa Isaga ku kalsoonaada.

-Maxaa dhacay kaddib markii malaa'igtii Ilaah ay Luut iyo qoyskiisii ka soo bixisay magaalada?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 19:24-25

24-Markaasaa Rabbigu wuxuu Sodom iyo Gomora ku soo daayey baaruud iyo dab ka iymid xagga Rabbiga oo sama ka soo daaay;
25-Wuuna rogay magaalooyinkaas, iyo Bannaankii oodhan, yo dadkii degganaa magaalooyinkaas oodhan, iyo wixii dhulka ka soo baxay oo dhan.

-Ilaah wuxuu gebi ahaanba burburiyey dadkii Sodom iyo Gomorrah.

-Ilaah wuxuu neceb yahay dembiga.
-Ilaah wuxuu ciqaab dembi oodhan.
-Ilaah wuxuu ku ciqaabaa dembiga dhimashada daa'imka ah.

-Maalmihii Nuux, Ilaah wuxuu dadka oo dhan ku burburiyey ama baabi'iyey daad.
-Sodom iyo Gomorahna, Ilaah wuxuu ku baabi'iyey dab.

-Markii malaa'igtii Rabbiga ay soo kaxaysay Luut iyo naagtiisa,



iyo labadiisii gabdhood oo ay magaalada Sodom ka soo saareen, ayey Luut ku yiraahdeen qoyskaagu yaanu magaalada gadaal u eegin.

-Balse xaaskii Luut ayaa Ilaah addeeci weysay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 19:26

26-Laakiinse naagtiisii oo daba socotay ayaa di u eegtay, waxayna noqotay tiir cusbo ah.

-Ilaah wuxuu naagtii Luut u beddelay tiir cusbo ah.

-Maxaa Ilaah ugu beddelay naagtii Luut Tiir cusbo ah?
-Waayo naagtii Luut ayaa Ilaah addeeci weysay, oo gadaal soo eegtay.

-Waa maxay sababtii xaaskii Luut ay gadaal u soo eegtay?

-Waayo waxay aad u jeclayd dembiga.
-Welibana ma aysan doonaynin inay magaalda ka tagto.

-Ilaah wuxuu neceb yahay dembiga.
-Ilaah wuxuu mar waliba ciqaabaa dembiga.
-Ilaa wuxuu mar waliba dembiga ku ciqaabaa dhimashada daa'imka ah.

-Haddii aad jeceshahay dembigaaga isla sidii xaaksii Luut, Ilaah wuxuu kuugu ciqaabayaa dhimasho.

-Haddii aadan doonayn inaad dembiyadaada ka soo tagto, isla sidii xaaskii Luut, Ilaah wuxuu kuugu ciqaabayaa dhimasho.